AWB
Asxaabta Walaalaha Buulaay

AWB
Asxaabta Walaalaha Buulaay

# ASXAABTA WALAALAHA BUULAAY

# (ASW)

# QAAB DHISMEEDKA HEY'ADDA

**Phone:** +252610505326 **E-mail:** info@awb.com **Website:** www.awb.com
**Head office:** Main Rd, Gaalakaroor, Buloburte, Somalia

# QAAB DHISMEEDKA HEY'ADDA

**Hey'adda:** Asxaabta Walaalaha Buulaay (AWB)
**Dalka:** Soomaaliya
**Diiwaan gelin:** Ka diiwaan gashan Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya

## HORDHAC

Buulo Burte waa magaalo yar oo taariikhi ah kuna taal bartamaha Soomaaliya. Magaaladu waxay wajahday duruufo adag oo muddo dheer soo jiitamayay. In ka badan toban sano, shacabka magaalada waxay la daalaa dhacayeen go'doon, saboolnimo aad u daran, iyo inaysan haysan adeegyada bulshada ee aasaasiga ah. Magaalada waxaa haatan maamula ciidamada qaranka oo ay si weyn u taageerayaan ciidamo Jabuuti ah iyo maamulka Hirshabeelle. Amniga ayaa soo xasilaya tan iyo markaas, waxaana uu yahay mid deggan marka loo eego waqtiyadii hore. Si kastaba ha ahaatee, adeegyada dadweynaha waa kuwo kooban, kuwaasoo aan soo gaarin qoysaska nugul ama aan ku filanayn.

Si looga jawaabo caqabadahaas, ayaa waxaa la aasaasay Asxaabta Walaalaha Buulaay (AWB) sanadkii 2019. Waxaana aasaasay koox rag iyo dumar ah oo ka soo jeeda Buulo Burte oo ay ka go'an tahay horumarinta bulshada. Himilada ugu weyn ee loo aasaasay Asxaabta Walaalaha Buulaay waa in la siiyo taageero naf-badbaadin dadka ugu nugul ee degmadaas—gaar ahaan agoonta iyo carruurta ka soo jeeda qoysaska danyarta ah—iyadoo la abuurayo fursado lagu helo waxbarashada aasaasiga ah, adeegyada bulshada, iyo sidii ay u maarayn lahaayeen nolol-maalmeedkooda.

## HADAFKA IYO UJEEDDOOYINKA (AWB)

AWB waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo si rasmi ah uga diiwaangashan Soomaaliya, iyadoo xarunteedu tahay magaalada Buulo Burte. Hey'addan wuxuu ka go'an xoojinta midnimada, horumarinta koboca bulshada, iyo dhiirrigelinta dadka degan Buulo Burte iyo guud ahaan jaaliyadda Soomaaliyeed ee dibadda. Hadafka ugu weyn ee laga leeyahay AWB waa sidii loo soo celin lahaa kalsoonidii, sharaftii iyo walaaltinimadii dadka reer Buulo Burte, isla markaana loo beddeli lahaa nolosha dadka, oo wax loogu qaban lahaa, korna loogu qaadi lahaa awoodda dadka masaakiinta iyo agoonta ah ee ku nool degmada. Shaqada hey'addu waxay si gaar ah ugu salaysan yihiin ujeeddooyinkasoo socda:

- In dib loo soo celiyo lana soo nooleeyo kalsoonidii, walaaltinimadii iyo is jacaylkii ka dhexeeyay dadka degmada ka yimid
- In la abuuro nidaam wanaagsan oo isku xira dadka degmada, isla markaana la xoojiyo lana joogteeyo xiriirkaa isaga ah
- In wax laga qabto burburka dhaqan-dhaqaale ee ku dhacay degmada, isla markaana la abuuro mashaariic lagu horumarinayo arrimaha bulshada, dhaqanka, dhaqaalaha iyo wax soosaarka degmada

## QAAB DHISMEEDKA GOLEYAASHA AWB

Hey'adda samafalka ee Asxaabta Walaalaha Buulaay (AWB) waxay leedahay qaab dhismeedka hoos ku qoran oo ka kooban saddex gole:

- **Golaha Aasaasayaasha:** Waa aasaasayaasha hey'adda wuxuuna ka kooban 35 xubnood, golahan waxaa laga dhex doortaa Guddiga Fulinta oo ka kooban sagaal (9) xubnood si ay ula socdaan howlaha maalinlaha ah iyo hirgelinta barnaamijyada.
- **Golaha La-taliyayaasha:** Waxay ka kooban yihiin toddoba (7) xubnood, golahani wuxuu bixiyaa talooyin istiraatiiji ah iyo hagitaan heer sare ah.
- **Golaha Wakiillada dalalka dunida:** Waa xubno si gaar ah loo magacaabay kuwaas oo matala bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku sugan dalal kala duwan, kuwaas oo taageera himilada AWB iyaga oo xoojinaya xiriirka caalamiga ah, kuna dadaalaya ururinta dhaqaalaha.

Golayaasha kala duwan ee maamulku waxay xaqiijiyaan hoggaan hay'adeed, waxay qeexaan jihada istiraatiijiyadeed, waxay gaarayaan go'aannada hey'adda, waxay korjoogteeyaan maaraynta kheyraadka, waxayna hagayaan fulinta barnaamijyada *(fiiri qaab-dhismeedka maamulka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah).*

## UJEEDDOYINKA MAAMULKA

- Kor u qaadista maamul wanaagga iyo isla xisaabtanka hay'adeed
- Horumarinta xeelado ku saleysan xog iyo qorshayaal ficil oo la cabbiri karo
- Xoojinta awoodda ururinta deeqaha iyo kicinta shabakadaha dhaqaalaha
- U doodista mudnaanta bulshada iyo danaha xubnaha
- Ilaalinta daahfurnaanta hawlaha iyo mashaariicda hay'adda
- Matalaadda AWB heer qaran iyo heer caalami ah

## GOLAHA AASAASAYAASHA

Waa golaha ugu sarreysa hey'adda ee xagga maamulka, wuxuuna wuxuu ka kooban yahay soddon iyo shan (35) xubnood. Xubnaha golahani waxay masuul ka yihiin dejinta siyaasadaha, qaabaynta iyo fulinta barnaamijyada iyo maaraynta maaliyadda.

### Guddiga Fulinta

Guddigan wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo laga soo doorto Golaha Aasaasayaasha, waxaana xilkoodu yahay hagidda howlaha maalinlaha ah iyo hirgelinta barnaamijyada.

### Jagooyinka muhiimka ah

1. Guddoomiye
2. Guddoomiye kuxigeen
3. Xoghaye Guud

4. Qasnaji
5. Agaasimaha Barnaamijyada
6. Agaasimaha Xiriirka iyo Wacyigelinta
7. Agaasimaha Mashaariicda
8. Agaasimaha Ururinta dhaqaalaha
9. Agaasimaha Kormeerka

**Mas'uuliyadaha**

- Dejinta iyo hirgelinta qorshayaasha istiraatiijiyadeed iyo siyaasadaha shaqo
- Hoggaaminta iyo maaraynta hirgelinta barnaamijyada iyo bixinta adeegyada
- Meelmarinta iyo fulinta miisaaniyadaha, qorshayaasha sanadlaha ah iyo warbixinnada
- Hubinta waafaqsanaanta sharciga, anshaxa, iyo heerarka maaliyadeed
- Matalaadda AWB gudaha dalka iyo madalaha caalamiga ah
- Dabagalka qorshayaasha maaliyadda
- Dabagalka barnaamijyada iyo adeegyada
- Talabixinta miisaaniyadda iyo warbixinnada
- Dhaqaale raadinta

**GOLHA LA-TALIYAYAASHA**

Guddigan waxa uu ka kooban yahay toddoba xubnood oo ka mid ah dadka bulshada laga qadariyo, khubaro farsamo, iyo odayaal bixiya talooyin istiraatiiji ah iyo aragtiyo wax ku ool ah.

**Mas'uuliyadaha**

- Talo-bixin istiraatiiji ah iyo taageero siyaasadeed
- Raadinta ilo deeqaale iyo kicinta shabakadaha dhaqaalaha
- Dhiirrigelinta hindisayaasha ururka iyo taageerada siyaasadaha
- Horumarinta himilada AWB iyadoo la adeegsanayo shabakadaha kala duwan
- Dhexdhexaadinta xalinta khilaafaadka iyo kor u qaadista isfahamka bulshada

**WAAKIILLADA DALAKA DUNIDA**

Golahani waa xubno si gaar ah loo magacaabay oo matala bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku sugan wadamo kala duwan, una ololeeya horumarinta himilada AWB.

**Mas'uuliyadaha**

- Kor u qaadista aragtida iyo howlaha AWB ee jaaliyadaha qurbaha iyo ururrada caalamiga ah
- Fududeynta iskaashiga ururrada, hay'adaha, iyo deeq-bixiyeyaasha dalaka ay ku sugan yihiin
- Abaabulka iyo u olololeynta ururinta deeqaha iyadoo la adeegsanayo qurbajoogta

- Metelaad dhaqameed iyomid bulsheed, si loo xoojiyo xiriirka u dhexeeya qurbajoogta iyo bulshada gudaha
- Bixinta talooyin ku saabsan arrimaha caalamiga ah, fursadaha istiraatiijiyadeed, iyo horumarka siyaasadeed ee la xiriira waajibaadka AWB
- Ka qeybqaadashada u doodista wacyigelinta baahiyaha bini’aadantinimo ee Buulo Burte

**Shaxda1:** *Qaab dhismeedka AWB*

